

**Soo Jeedinta Lr. 3**

*Qoraalka buuxa ee cabbirkan ayaa laga heli karaa Xafiiska Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*

**Dib-U-Cusbooneysiinta Canshuurta Wakhtigeedu Dhammaanayso ee Mashaariicda Teknolojiyada iyo Hantida Waaweyn**

Guddiga Agaasimayaasha ayaa meel mariyay Qaraarka Lr. 913 ee khuseeya dib-u-cusbooneysiinta canshuurta mashaariicda teknolojiyada iyo hantida waaweyn. Si loo casriyeeyo nidaamada teknolojiyada, loo xoojiyo kaabayaasha iyo amniga xogta, loo taageero waxbarashada ardayda iyada oo loo marayo manhajka iyo softiweerka waxbaridda, loo helo qalab, oo ay ku jiraan aaladaha ardayda, iyo bixinta tababar ka aadan ardayda iyo shaqaalaha, soo jeedinta waxay Degmada u oggolaanaysaa inay soo rogto canshuuraha dheeraadka ee soo socda ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada:

Sannadka Ururinta	Heerka Canshuurta ee La Qiyaasay/\$1,000 Qiimaha la qiimeeyay	Caddadka Canshuurta
2027	\$0.54	\$35,500,000
2028	\$0.52	\$35,500,000
2029	\$0.49	\$35,500,000
2030	\$0.47	\$35,500,000

dhammaan sida ku cad Qaraarka Lr. 913. Ma tahay in soo jeedinta la ansixiyo?

Haa  
Maya

Shuruudaha ansixinta: Aqlabiyad fudud (Dastuurka Washington, qodobka VII, qaybta 2(a))

**Bayaanka lagu taageerayo**

Holly Muenchow

<https://citizensfornorthshoreschools.org/>

Ku codeynta *Haa* ee Soo Jeedinta 3 waxay cusbooneysiisaa ballanqaadka Northshore ee ku aadan teknolojiyada fasalka casri ah oo tayo sare leh ee arday kasta. *Tani maaha canshuur cusub.* Canshuurta beddelka teknolojiyada waxay hubinaysaa in ardaydu helaan qalabyo casri ah, manhaj elektaroonig ah, iyo taageero farsameed ee loo baahan yahay si loogu guuleysto adduunka dhijitaalka ah ee sii kordhaaya.

Ayagoo ay ku mahadsan taageerada aadka u weyn ee codbixiyeyaasha afar sanno ka hor, arday *kasta* oo Northshore ah hadda wuxuu helayaa qalab ku habboon heerka fasalkooda iyo baahiyaha waxbarashada. Helitaankaan 1:1 wuxuu ardayda u oggolaanayaa inay bartaan, abuuraan, oo ay wada shaqeeyaan gudaha fasalka iyo dibadda. Cusbooneysiinta canshuurta waxay ilaalinaysaa helitaanka iyo cusbooneysiinta ama beddelidda qalabka jadwal mas'uuliyad leh iyo dib u isticmaalidda qalabka markay suurtagal tahay. Sidoo kale waxay sii wadaysaa adeegyada Taageero Farsameedka Qoyska ee la bilaabay 2020, kuwaas oo noqday kuwo muhiim u ah ardayda, macallimiinta, iyo qoysaska.

Tallaabadan waxay xoojinaysaa waxbarashada STEM waxayna taageertaa isku-dhafka ammaanka leh ee mas'uuliyadda leh ee teknolojiyada cusub, oo ay ku jiraan qalabka AI ee soo baxaya. Waxay maalgalisaa waxbarashada tooska ah ee fasalka iyada oo loo marayo tababarka macallimiinta, teknolojiyada la qabsiga ee baahiyaha ardayga ee gaarka ah, iyo barnaamijyo kiciya xiisaha iyo fikirka qotada dheer.

*Waxbarashada teknolojiyada waa qayb muhiim u ah u diyaar garoowga shaqada.* Codka *Haa* ee Soo Jeedinta 3 wuxuu ka dhigayaa Northshore mid hal-abuur leh oo mustaqbalka eegta. Taageer guusha ardayda—ku codee *Haa* si loo cusbooneysiyo canshuurta teknolojiyada.

**Beeninta bayaanka looga soo horjeedo**

Guddiga ka soo horjeeda maalgelinta dugsiga waxuu iska indhatirayaa baahida si degdeg ah u sii kordhaysa ee teknolojiyada fasalka. Ardaydeennu waa inay ka qalin-jebiyaan iyagoo leh xirfado shaqo u diyaarsan adduunka casriga ah.

Soo Jeedinta 3 waxay dib-u-cusbooneysiisaa canshuurta teknolojiyada, iyadoo qalabka ardayda la casriyaynayo isla markaana la taageerayo barnaamijyo la xaqiijiyay oo ardayda iyo macallimiintu maalin walba isticmaalaan. Cod Maya ah wuxuu la micno yahay dib-u-dhac iyo carqalad ku timaadda waxbarashada. Qoysaska Northshore si joogto ah ayay u taageereen maalgelinta. Ardayda u diyaari mustaqbalka. Ku Codee Haa ee Soo Jeedinta 3.

**Bayaanka Sharaxaadda**

Ansixinta Soo Jeedinta Lr. 3 waxay Degmada Dugsiga Northshore u oggolaanaysaa inay beddesho canshuurta teknolojiyada hantida waaweyn ee hadda jirta taasoo wakhtigeedu dhammaanayso dhammaadka sannadka kalandarka ee 2026. Canshuuraha laga soo ururiyo canshuurtaan beddelka ah waxaa loo isticmaali doonaa in lagu bixiyo horumarinta kaabayaasha iyo amniga xogta; soo iibinta qalabka, geynta, iyo dayactirka meertada noloshu; shatiga softiweerka, barnaamijyada oonleenka, iyo adeegyada rukunka; hirgelinta barnaamijyada softiweerka iyo bixinta tababarada la xiriira; joogtaynta iyo casriyaynta hababka teknolojiyada ee adeegyada waxbaridda iyo hawl-gelinta; tababarka socda ee ardayda iyo shaqaalaha ee la xiriira isdhexgalka, isticmaalka, iyo falanqeynta; iyo taageeridda qaadashada teknolojiyada cusub ee soo baxaya.

Canshuurta teknolojiyada hantida waaweyn ee afarta sanno ah ee la soo jeediyay ayaa oggolaan doonta ururinta \$35,500,000 ee canshuuraha hantida ee gudaha Degmada sannad walba ee sannadaha 2027, 2028, 2029, iyo 2030. Heerka canshuurta ee halkii \$1,000 ee qiimaha la qiimeeyay ee loo baahan yahay inuu soo saaro caddadyadaan canshuurta ayaa lagu qiyaasay inay tahay \$0.54 sannadka 2026 si loogu ururiyo 2027, \$0.52 sannadka 2027 si loogu ururiyo 2028, \$0.49 sannadka 2028 si loogu ururiyo 2029 iyo \$0.47 sannadka 2029 si loogu ururiyo 2030. Qiimaha canshuurta ee saxda ah iyo caddadka la ururinayo ayaa laga yaabaa in la hagaajiyo iyadoo lagu salaynayo qiimaha dhabta ah ee qiimeynta la qiimeeyay ee hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada iyo xaddidaadyada uu soo rogay sharciga Gobolka wakhtiga la soo rogayo canshuurta.

Ka dhaaftaanka canshuurta hantida ayaa laga yaabaa in ay heli karaan qaar ka mid ah mulkiileyaasha guryaha ee da'da weyn ama kuwa naafada ah kuwaas oo buuxiya xadka dakhliga la cayimay. Si aad u hesho macluumaad la xiriira ka dhaaftaannada, ka wac Qiimeeyaha Degmada King taleefanka (206) 296-3920.

**Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkan, la xiriir:**

JoLynn Berge  
Sarkaalka Madaxa  
Maaliyadda  
(425) 408-7721  
jberge@nsd.org

**Bayaanka looga soo horjeedo**

Dominique France, JoAnn Tolentino, Lynda Schram  
<https://SchoolDataProject.com/districts.html>

Canshuurta Teknolojiyada ee la soo jeediyay waxaa lagu tilmaamay sii waddidda barnaamijyada ee hadda jira, laakiin ma aha dib-u-cusbooneysiin fudud. Waa kordhin 77% marka loo eego canshuurta teknolojiyada ee hore. Codbixiyeyaasha waa in la ogeysiiyaa in cabbirkan uu dalbanayo maalgelin aad uga badan tii hore, ayna ahayn dib-u-cusbooneysiin fudud.

Afartii sanno ee la soo dhaafay, tusmooyinka qiimaha teknolojiyada ee aadka loo isticmaalo ayaa muujiya in kharashyo badan oo teknolojiyada aasaasiga ah—sida qalabka ardayda, qalabka shabakadda, adeegyada IT-ga ee aasaasiga ah—sii jireen ama hoos u dhaceen marka la saxo sicir-bararka. Inkastoo qaar ka mid ah alaaboyinka gaarka ah ay la kulmeen koror ku meel gaar ah oo qiimaha, sicir-bararka guud ee kharashyada teknolojiyada ma taageero koror cabbirkan ah.

Degmada waxay sheegtay in canshuurta maalgelin doonto qalabka ardayda hal-arday-hal-qalab, casriyaynta teknolojiyada fasalka, manhajka dhijitaalka ah, kaabayaasha ammaan ah, iyo taageero ardayda waxbarashada gaarka ah. Kuwani waa isla ujeedooyinka guud ee lagu xusay canshuurta teknolojiyada ee hore. Haddii maalgeshiyadaan horrey loo maalgeliyay, maxaa hadda loogu baahan yahay koror 77% ah?

Canshuur-bixiyeyaasha waxaa laga codsanayaa inay ansixiyaan caddadyo lacageed, ma aha ujeedooyin. Ka hor inta aan la ansixin kordhin weyn, codbixiyeyaashu waxay xaq u leeyihiin warbixin hufan oo ku saabsan ballanqaadyadii hore, natiijooyinkii la gaaray, iyo sababo cad oo muujinaya sababta heerarka maalgelinta hadda aysan mar dambe ugu filayn. La-xisaabtanka natiijooyinka waa inuu la socdaa codsi kasta oo ku saabsan canshuuro si weyn loo kordhinayo.

**Beeninta bayaanka lagu taageerayo**

Xisaabta degmada ma is waafaqsana. Qalabka ardayda ayaa la sheegay in si buuxda loo maalgeliyay canshuurtii hore, markaa sidee dayactirka iyo beddelka qalabka xaddidan ay sabab u noqon karaan koror dhan 77%? In tan loogu yeero "dib-u-cusbooneysiin" waxay si khaldan u muujinaysaa baaxadda kordhinta, iyada oo aan jirin caddeyn ama sharaxaad.

Codbixiyeyaashu waa inuu sidoo kale ogaadaan in luqadda warqadda codbixintu aysan ku xaddidnayn sida lacagaha loo isticmaalo. Guddigu wuxuu dib u qoondeyn karaa lacagaha iyada oo aan oggolaansho codbixiye loo baahnayn. Ku Codee Maya—caddeyn ayaa loo baahan yahay.

Doorashada Gaarka ah ee Febraayo 2026

**Degmada King Buug-yaraha Rasmiga ah ee Codbixiyeyaasha Deegaanka**

sida ay codsatay Degmada Dugsiga Northshore Lr. 417

**Isku qor si aad u hesho digniimaha warqadda codbixinta!**

Hel qoraallo taleefan ama iimeelyo ah marka warqaddaada codbixinta la sii habeynaayo oo la tiriyo. Iska qor barta [kce.wiki/TrackMyBallot-SO](https://kce.wiki/TrackMyBallot-SO).



**Is diiwaan geli si aad u codeyso**



**Oonleenka:** Booqo [VoteWA.gov](https://VoteWA.gov) si aad oonleenka iskaga diiwaan geliso oo aad u codeyso. Wakhtiga kama dambeysta ah ee is diiwaan gelinta oonleenka ee Doorashada Gaarka ah ee Febraayo waa Febraayo 2.



**Boostada:** Ka soo degso oo daabaco foomka diiwaan gelinta barta [kce.wiki/VoterReg](https://kce.wiki/VoterReg) oo boostada ugu dir Doorashooyinka Degmada King: **919 SW Grady Way, Renton, WA 98057**. Waa in la helaa ugu dambeyn Febraayo 2.



**Shakhsi ahaan:** Waxaad shakhsi ahaan iskaga diiwaan gelin kartaa xarunta guud ee Doorashooyinka Degmada King ilaa iyo Febraayo 10, Maalinta Doorashada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saacadaha iyo adeegyada waxaad ka heli kartaa barta [kingcounty.gov/elections](https://kingcounty.gov/elections).

**Nala soo xiriir si aad u hesho buug-yarahaan oo qaab kale ah.**

Contact us to receive your voting materials in Chinese, Korean, Russian, Somali, Spanish, or Vietnamese.

如需獲取您的中文投票資訊，請與我們聯絡。

한국어로 투표 자료를 받으시려면 저희에게 연락하세요.

Свяжитесь с нами, чтобы получить материалы для голосования на русском.


Nala soo xiriir si aad u hesho agabyadaada codeynta oo ku qoran Af-Soomaali.

Comuníquese con nosotros para recibir sus materiales de votación en español.

Xin vui lòng liên lạc với Sở Bầu cử Quận King để nhận tài liệu bầu cử bằng tiếng Việt.



**Baro wax dheeraad ah oo ku saabsan sanduuqyada lagu rido, Xarumaha Codbixinta, iyo in ka badan!**



**Waxaan halkaan u joogaa in aan ku caawinno!**

Shaqaalaha doorashooyinka ayaa kaa caawinno kara inaad is diiwaan geliso oo aad hesho warqad codbixin cusub ilaa iyo Maalinta Doorashada. Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah oo ma doonaysaa inaad si gaar ah u calaamadaysa warqaddaada codbixinta? Ka hel warqaddaada codbixinta oonleenka barta [kingcounty.gov/elections/obmp](https://kingcounty.gov/elections/obmp) si aad uga faa'iidaysto Barnaamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka.

**Warqaddaada codbixinta ayaa waxaa ku duuban macluumaad waxtar leh! Iska xaqiiji inaad lifaaqa warqaddaada codbixinta ka dhex eegto:**

- shanta sanduuq ee lagu rido warqadda codbixinta ee kuugu dhow,
- halka aad ka heli karto caawinnaad shakhsi ahaanneed,
- sida loo daabacdo warqaddaada codbixinta haddii taada kaa lunto ama waxyeello soo gaarto,
- sida loo soo celiyo warqaddaada codbixinta,
- iyo in ka badan!



**Yaa deeq ku bixiya ooleyaasha?**

Eeg ku-deeqeyaasha dhaqaale ee musharaxiinta iyo cabbirrada sharciga ee gobolka iyo dowladda hoose: Guddiga Kashifaadda Dadweynaha [www.pdc.wa.gov](https://www.pdc.wa.gov) Wicitaanka Lacag La'aanta 1-877-601-2828

206-296-VOTE (8683)

[elections@kingcounty.gov](mailto:elections@kingcounty.gov)  
[kingcounty.gov/elections](https://kingcounty.gov/elections)

Baraheena Bulshada @kcelections



